



New York State Board of Regents
MaryEllen Elia
Commissioner of Education
The State Education Department
The University of the State of New York / Albany, NY12234
Office of Communications



WARARKA
BAAHIN DEGDEG AH Maars 7, 2017

Wixii macluumaad dheeri ah, La xiriir:
Jonathan Burman ama Jeanne Beattie
(518) 474-1201
www.nysed.gov

**TILMAAMTA XUQUUQAHAD ARDAYDA SOOGALOOTIGA AH IYO XEERKA
SHARAFTA EE ARDAYDA EE DHAN HADDA WAXAA LAGU HELI KARAA
20 LUUQADOOD.**

Tilmaamtii dhawaan lasoo saaray ee Xeerka Sharafta ee Ardayda oo Dhan (DASA) iyo xuquuqaha ardayda soo galootiga ah ayaa hada lahelayaa ayagoo kuqoran 20 ka luuqadood ee ugubadan loogana hadlo gobalka New York, Madaxa Warbarashada MaryEllen Elia ayaa maanta udhawaaqay. Ayadoo laga jawaabaayo kor ukaca tirada warbixinada xoog usheegashada, midab takoorka iyo dhibaataynta wadanka oo dhan ka dhacaaya iyo cabsida iyo wareerka ka dhalanaaya tallaabooyinkii ugu danbeeyay ee dawlada federalka ah ay qaadaysay, Waaxda Waxbarashada ee Goalka, ayadoo kaashanaysa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, waxay tilmaamo siinaysaa deegaanada dugsiga kuwaasoo ay quseeya mawduucyadaan muhiimka ah. Hadda waalidiinta, masuuliyiinta iyo shaqsiyaadka kale ee xiisaynaaya waxay uhaystaan fasax balaaran tilmaamtan muhiimka ah.

"Markaan isla jirsano, waxaan xaqijinaynaa in ardaydayadu ay dareemaan kuwo badqaba taageerana kuhelaaya goobahooda waxbarasho," ayuu dhahay Chancellor Betty A. Rosa. "Waa inaan xaqijinaa inaan utaaganahay bixinta xarumo waxbarasho oo magangalyo leh, halkaasoo ardayda ay xor uyihiin inay waxbartaan ayadoon loo fiirinayn midabkooda, qoomiyadooda, luuqadooda ay guriga kuhadlaan, xaaladooda soogalootinimo, dookhooda galmo ama wax kasta oo lamida. Waa inaan u muujinaa carruurta oo dhan sida kuweena oo kale,, si diiran oo naxariis leh."

"Waaxda Waxbarashada ee Gobalka New York waxay si adag ufiirinaysaa falkasta oo waxyeelaynkara habkooda dugsiga ee ardaydu wax kubartaan maalinkasta", ayuu yiri Gudoomiye Elia. "Dhamaan ardaydayadu waxay xaq uleeyihiin waxbarasho bilaash ah waana inuusan jirin ilma kacabsada inuu iskuul aado. Waa inaan samaynaa waxkasta oon awodno si aan u abuurno goobo waxbarasho oo amaan ah oo taageero leh, ayna kamid tahay inaan siino dhamaan waalidiinta iyo masuuliyiinta lasiyo adeegyada ay ubaahanyihiin oo ah in warbixin laga siyo xaqooda iyo xaqa caruurtooda."

Waaxdu waxay hada samaysay adeegyo lasiyo waalidka, dadka masuulka ka ah, iyo shaqsiyaadka kale ee danaynaaya oo loo turjumay tobanka luuqadood ee ugu saraysa ee looga hadlo Dhamaan Gobalka New York. Waxay kalayihiin: Spanish, Chinese, Arabic, Bengali, Russian, Urdu, Haitian Creole, French, Karen iyo Nepali. Tani waxay balaarinaysaa oynaa dhisaysaa ayadoo laraacaayo shaqada laqabtay lanakaashanaayo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Gobalka New York (OAG) si loo xaqiijiyo in xaquuqda ardayda la ilaalsho sida ugu saraysa ee sharcigu qabo.

Waxyabaha I aturjumay waxaa ka mid ah kuwii dhawaan uu soosaaray Xeer Ilaaliyaha Guud Eric T. Schneiderman iyo Gudoomiye Elia, ayagoo xasuusinaaya deegaanada dugsiga

waajibaadkooda ah inay kudhaqmaan shuruucda ustaala Gobalka iyo dawlada federalka ah kuwaasoo xaq usiinaaya caruurta soogalootiga ah inay kubiiraan iskuulada dawlada ee New York ayagoon dareemayn cabsi ah in lagu xadgudbo. Tilmaamuhu waxay siinayaan deegaanada haysta maclumaadka inay ka adkaadaan waajibaadkooda sharciga ah ayadoo tixgalinaaya ardaydooda iyo sirnimada diiwaanada ardayga.

waxaa siidheer, tilmaamo iyo adeegyo lasiinaayo shaqaalaha dugsiga, ardayda, iyo waalidiinta si loogu caawiyo helida waxbixinta iyo ciwaanka dhacdooyinka dhibaataynta, xoog usheegashada, iyo midab takoorka, sidaa si lamida si kor loogu qaado dadaalada lagu dhisaayo laguna ilaolinaayo jawiyo iskuul oo dagan kuwaasoo waafaqsan DASA.

[Waxyaabahaan, oo 20 luuqadood kuqoran waxaad kahelaysaa halkaan.](#)

[Maclumaadka laxiriira talaabooyinka soogalootiga waxaa laqa helayaa halkaan, halka maclumaadka laxiriira tilmaamaha iyo adeegyada ee DASA laqa helikaro halkaan.](#)